

kaluu ahaa mid aad u dheereeya xagga socodka ama orodka.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Bakayle yidhi, “Diiinow, maad ila baratami.”. Diinkii inta uu yaabay ayuu ku yidhi waayahay.

Waxay calaamad ka dhigteen labo geed oo xarig dhexda kaga xireen. Markii orodkii ay bilaabeen ayuu markiiba bakaylihi in badan ka go`y . Ka dibna inta uu qosol ku dhuftay ayuu yiri, “Anigu waan seexanayaa intaad sii gaatamaysid, ka dibna marka aan hurdadayda dhameysto ayaan ku soo gaadhayaa adiga oon kala barkaba gaadhin.”

Halkii ayuu Bakayle ku seexday, Diinna orodkiisii ayuu iska sii socday.


Waxa uu socdaba Diin waxa uu u dhowaaday meeshii xariga yaallay. Ninkii la oran jiray

Bakayle ayaa ka soo kacay hurdadii, arkayna Diin oo meesha ka muuqan, ka dibna ka

bilaabay orod, laakiin ninkii bakayle la oran jiray meeshaas
ayuu ku hadhay oo Diinkii kaga

badiyay baratankii, maxaa yeelay, wuxuu dhibyareystay oo uu
quudhsaday orodka. Diinnka. Sidaas ayuu diinkii ku badiyey
orodkii. Markaas sidaa awgeed ayay Soomaalidu ku
maahmaahday, “Ninkii seexdaa siciis dibi dhalay.”

Bakayluhu haddii uuna seexan diinku kama uu badiyeen
orodka.



Illustrasjon: jiaqing1/ Adobestock